



Dayrta 2020: Wararkii U Dambeeyey ee Luulyo 11

Luulyo 11, 2020

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah PPS,

Waxaan ka warqabnaa in dhammaantiin aad fileysaan in aad ogaataan qorshaheena hordhaca ah ee xilliga dayrta 2020. Waxaan jecelanahay in aan fulino ballanqaadkayagii ahaa in aan idinla socodsii no si joogta ah qorshaheena diyaargarowga kaasi oo bilaabmay bishii Maarso walina socda ilaa bilaha xaggaaga.

Marka aan sameyno wax go'aan ah, mudnaantayada koowaad waxa weeyaan caafimaadka iyo badqabka ardaydeena iyo shaqaalaha. Qorshayaashayada soo baxayaa iyo go'aanada waxa ay ku xiran yihiin tilmaamaha ugu dambeeya ee ay bixiyaan hay'adaha caafimaadka dadweynaha iyo [tilmaamaha ka imanaya Waaxda Waxbarashada Oregon](#) marka aynu u diyaargarooobeyna dib ugu noqoshada iskuulada. Waxa muhiim ah in ardaydeena, qoysaskeena, iyo shaqaalaha ay fahmaan **waxa aanu dib u furi doonaa dhismayaasha iskuulada haddii khabiirada caafimaadka dadweynaha ay yiraahdaan waa lagu noqon karaa oo dhibaato ma jirto. Haddii aynaan dhismayaasha iskuulada furin karin, dhammaan macalimiinta wax dhigeysa iyo ardayda waxa ay waxbarashadoodii ku qaadan doonaa online/muuqaal baahiya** ilaa iskuulada la furi karo oo ay ardaydu ku noqon karaan iyaga oo nabadqaba. Waayo-aragnimada waxbarashada ardayda ee online-ka ahi waa waayo-aragnimo ka gedisanaan doonta tii ugu dambeysay ee aan ardayda siinay xilligii gu'ga, waxaa ka mid ah inay helaan waqti dheeraad ah oo waxbarasho la siiyo iyo agab gijil ah.

Iyada oo aan ka shaqeyneyno qorsheyaasheena dib u furista, tixgalinteena ugu muhiimsani waa sida ugu wanaagsan ee aan addeegyadii iyo taageeradii ugu fiicneyn ee waxbarashada iyo baahiyaha shucuurta bulshada arday kasta u siin lahayn, gaar ahaan ardayda aan cadaanka ahayn. Waxa aan sidoo kale tixgalin siin doonaa sidii aan u ogaan lahayn baahiyaha ardaydeena oo ay ka mid yihiin ardayda leh baahiyaha khaaska ah sidii ay u heli lahaayeen gargaarka ay u baahan yihiin ee u gaarka ah. Waxa aan sii wadi doonaa in aan bixino cuntadii iyo gargaaradii kale ee lagama maarmaan ahaa, sida qalabka teknoolajiga ee ardaydeena. Waxa aan sidoo kale u hoggaansanaan doonaa [hagida mab'aadiina iyo Fici u Bedelida Aragtida](#), iyada oo feejinaan gaar ah la siinayo sida mudnaanta loo siinayo ardaydeena uu sida gaarka ah waxyeelada ugu gaarsiiyey xanuunka saf mareenka ahi: Madowga, dadka dhulka loogu yimid iyo ardayda midabka ah.

Waxa aanu ka shaqeynaynaa iyada oo aan ku dadaaleyno in si nabadgelyo ah sanad-dugsiyeedka 2020-21 ku bilaabmo bisha Sebtember 2deeda. Sidee ayuu u egaan doonaa todobaadka ugu horeeysa iskuulka, bisha ugu horeeysa, iyo simistartka ugu horeeya waxa ay ku xirnaan doontaa xaaladaha la xiriiira xanuunka COVID-19. Mar labaad, dhammaan qoryashaayeen waxay ku xiran yihiin tilmaamaha ugu dambeeyey ee cusub kana yimaada hay'adaha caafimaadka. Haatan, qorshaheena hordhaca ah waxaa ka mid kuwan soo socda:



Waxa aan soo jeedineynaa qaab ah in labada todobaad ee ugu horeeya iskuulka, bisha Sebtember 2deed ilaa 11 keeda, in loo hibeeyo arrimo dhowr ah kuwaasi oo kala ah shucuurta bulshada aasaasiga iyo qeybo dhinaca waxbarashada ah sidii loo xaqiijin lahaa ardayda, macalimiinta iyo qoysasku inay diyaar u yihiin hore waxbarashada ka bilaabi karaan. Hawlahani waxaa lagu qaadan doonaa iyaga oo muuqaal baahiyaha ah/ online oo ay ku jiraan:

- In macallinku toos ugu xiran yahay ardayda.
- Fursado door ah iyo dariiqooyin ay qoysasku ay si fiican ugu baranayaan teknoolajiga ay caruurtoodu ay isticmaali doonaan.
- Tababaro la siinayo macalliminta iyaga oo isticmaalaya teknoolajiga wax lagu baranayo iyo nidaamyo caafimaad oo cusub.
- Sameynta shucuurta bulshada sidii loo caawiyo in hoos loo dhigo cabsida iyo qulubka la soo maray bilihii la soo dhaafay.
- In la xaqiijiyo in arday kastaa helo qalab teknoolaji oo shaqeynaya oo si fudud ugu isticmaali karo online, gaar ahaa ardaydeena “ku cusub Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS)”.
- In loo diyaaro ardayda caafimaadka iyo nidaamka fay-qabka ee ay isticmaalayaan ka hor inta ay iskuulada ku soo noqon.

Waqtigani wuxuu inoo ogolaan doonaa in aan hubio in qalabyada aan ku isticmaaleyno marka ay ardaydeenu casharada ku qaadayaan online inuu si fiican guud ahaan u shaqeynayo, degmada dhammaanteed iyo in ardaya iyo macalimiintuna ay diyaar u yihiin, ayna isku xiran yihiin midba midka kale iyaga oo aan ku qabin wax dhibaato ah isticmaalida teknoolajiga aya isticmaali doonaan.

Waxa intaa ku xigi doonta soo jeedintani labada todobaad ee ugu horeeya in la bixiyo wacyi-galin,qorshaheena hadda waxaa ka mid ah in ardayda ku soo noqonaya iskuulada ee wax ku baran doona online loo habeeyo kooxo yar yar bisha Sebtember 14keeda, qaabkeena dib ugu soo noqoshada, waxaa ka mid ah in iskuulada iyo ardayda jadwalkoodu noqdo mid dabacsan iyada oo la filayo dhowr qorshe oo la xiriira xanuuno kala gedisan. Waxa aan idinla socodsiin doonaa wixii warar ah ee cusub marka aanu helno warar dheeraad ah iyo marka aan la tashiyo la sameyno khabiirada caafimaadka dadweynaha.

Himiladaydu waxa ay tahay in la xaqiijiyo sidii ardaydeenu waxbarashadoodii ay qaadan lahaayeen shan maalmood todobaadkii, meeshii ay doonaanba ha ku qaataane. Marka aan isku dheelitirno shuruudaha ay dhigayaa inta la isku jirsanayo(labo tallaabo) oo aanu jecelnahay in aan kordhino marka casharada la qaadanayo, qaabkeenu hadda wuxuu soo jeedinayaa in ardaydu in ay yimaadaan iskuulada ugu yaraan labo maalmood todobaadkii. Waxbarashada oo ay online ku qaataan waxay ka mid noqon doontaa qeyb ka mid ah waxbarashada arday kasta uu wax ku baran doono, iyada oo aan u diyaargaroobeyno inaan sii wado inay wax bartaan xaalad kasta oo aan ku jirno. Waxaan rabnaa inaan taageerno ardaydeena, macallimiinteena, iyo xubnaha qoysaskeena sidii ay tamartooda u noqon lahaayeen kuwa dabacsan marka aynu isku bedeleyno habka ay marna fasalada ku qaadanayaan marna ay online ku qaadanayaan casharadoodii, taasi oo ku xiran mar walba xaalada caafimaad ee isbedeleysa iyo xaalada nabadgelyo.



- **Pre-K ilaa fasalka 8aad:** Waxa aan hadda ka shaqeyneynaa sidii aan u sameyno qaabka ah kooxaha **A/B**.
 - Kooxda *A* waxa ay iskuulka iman doonaa maalmaha Isniinta iyo Tallaadada.
 - Kooxda *B* waxa ay iskuulka iman doonaa maalmaha Khamiista iyo Jimcaha.
 - Maalinta Arbacada waxaa la nadiifin doonaa fasalada labada kooxood iyada oo macallimiintu iyo shaqaaluhu ay qaadan doonaan tababaradii xirfadoodu kor loogu qaadayey.

Qaabkani kooxaha loo qeybiyey ee *A/B* wuxuu noo siin doonaa in ay ardaydu kala fogaadaan lana fuliyo shuruudaha laga rabo in ay ardaydu isku jirsadaan; si kale haddii loo dhigo, waxa hal mar fasalkiiba iman doona nus ka mid ah ardaydii fasalka maadaama ay markii hore fasalka arday fara badani markiiba joogi jirtay marka ay casharada qaadanayeen. Ardayda da'da dugsiyada hoose waxaa loo astayn doonaa hal macallin fasalkiiba kaasi oo noqon doona midka kaliya ee macallinka fasalkaasi ka noqonaya inta lagu gudo jira waayo-aragnimada waxbarashada ardayda. Waxa aan ka fikireynaa sidii aan si la mid ah ardayda dugsiyada dhexe iyagana hal macallin u asteyno qaab ah inuu macalin u noqdo fasalkiiba.

- **Waxa aan tixgaliyeynaa in qaab ah in ardayda Dugsiyada Sarre ay qaadan doonto afar fasal halkii simistarba** taasi oo isugeyn ah sideed fasal sanad-dugsiyeedka oo dhan, iyada oo la isticmaalayo qaabka kooxaha oo la mid ah ka PK-8 (taasi oo macnaheedu yahay, ardaydu in ay todobaadkii yimaadaan iskuulka todobaadkii labo maalmood). Jadwalkani wuxuu **u saamixi doonaa ardayda in ay ku dhammeeyaan hal simistar sanadkii oo dhan**. Tusaale ahaan, waxa suurtagal ah in arday qaato xilliga Dayrta Ingiriisi iyada oo Simistarka xilliga Gu'gana qaato Taariikh. Waxa aanu aaminsanahay in ay ardayda u saamixi doonto sidii ay diirada u saari lahaayeen fasalo kooban oo ka caawin doono sidii ay si weyn u guuleysan lahaayeen jawigaasi ay ku jiraan, ugu yaraan qeyb ka mid ah sanadka, oo qeybna ay imanayaan iskuulka qeybta kalena ay guryaha online ku qaadanayaa casharadii ay fasalka ku qaadan jireen.
- **Manhajkii dheeraadka ahaa iyo waayo-aragnimadii kale:** Waxa aan ka warqabnaa in casharada fasalka lagu qaato, marka aad eegto sida salka u ah waxbarashada dadweynaha in ay tahay qeyb waayo-arabimooda iskuulka ee ardayda ah. Waxa aan idinla wadaagi doonaa macluumaad ku saabsan fasaladii ay ardaydu dooran jireen, ciyaarihii, manhajyadii dheeraadka ahaa, barnaamijyadii IB iyo AP ahaa, farshaxankii, CTE iyo kuwa kale oo badan sida ugu dhakhso badan ee aan karno.

Waxa aan sii wadi doonaa inaan dib u eegis ku sameyno ikhiyaariga ah in ay ardaydu si buuxda casharada ugu qaataan online iyaga oo jooga guryahooda kuwaasi oo ah qoysaska iyagu doorbidaya in ayna caruurtooda u soo dirin iskuulada bilowga marka uu bilaabmayo sanad-dugsiyeedka. Wixii macluumaad dheeraad ah marka ay yimaadaan waan idinla socodsiin doonaa.

Sii wadista waxbarashada dhinaca online-ka ah: Marka aad eegto qorshaheena oo dhan, waxa aanu diirada saareynaa dhinaca caafimaadka, udub-dhexaad u ah ardayda iyo inay dabacsanaadaan, iyada oo aan ku talogaleyno in qorshaheena dib u furista iskuuladu ka mid noqdo inuu noqon karno mid



awoodeena ka baxsan. Marka kasta waxa suurtagal ah inaynu si buuxda ugu noqona in ay ardaydeenu ay casharadoodii ay ku qaataan guryaha. Waxa aan u diyaargarooobeynaa xaqiiqdan suurtagalka ah inay inoo qorsheysan tahay in aanu si degdeg ah dib ugu noqon karno haddii loo baahdo inay ardaydu online casharadooda ku qaataan sidoo kalena si degdeg ah ay marka loo baahdo iskuulada ay ku soo noqon karaan degmada oo dhan.

Macallinta waxaa la siin doonaa tababaradii xirfadooda macalinio lagu horumarinayey oo isdaba jog ah sidii loo taageeri lahaa inay hirgaliyaan barnaamijyada waxbarasho ee ay siiyaan ardayda. Waxa jiri doona kuwo isha ku haya oo qiimeeya horumarka ay waxbarashada ardaydu ka sameynayaan waxbarashadooda iyaga oo farta ku fiiqaya meesha ay ardaydaasi in laga taageero uga baahan yihiin. Qaab kasta oo aanu tixgalinta siineyno in iskuuladeenu u shaqeeyaan, macallimiintu waxa ay diirada ku hayn doonaan sidii ay u sii wadi lahaayeen inay ardayda waxbarashadoodii siiyaan, haddii ay tahay inay ku siinayaan fasalada dhexdooda ama iyaga oo guryahooda online ku qaadanaya

Waxa aan sii wadi doonaa inay kuwasi noqdaa kuwa lala qabsado, ayna fahmaan mid kasta oo ka mid ah ardaydeena, macallimiinteena iyo shaqaaleena,, waalidiinta kuwaasi oo inagu tiirsanaa afartii bilood ee la soo dhaafay. Ma jirto dariiqo sax ah xilliga dayrta ah, laakiin waxa aan aad uga hawlgaleynaa in aan qof kasta oo ka mid ah bulshadeena iskuulada ay helaan xilligan dayrta waxbarashada suurtagalka ah.

Waxa aan idinla socodsiin doonaa marba wixii cusub ee soo kordha anaka oo la shaqeyna qoysaskeena, shaqaalaha aan xiriirka leenahay iyo daneeyaasha dugsiyada degmada oo ay ka mid yihiin jawaabcelintii aanu ka helnay sahankii qaar badan oo qoysaska PPS ka mid ahi ka soo warceliyeen.

Waanu qiimeyneynaa jawaabcelintiina iyo ra'yihiiina aad ku soo biirineysaan inta aanu kala haadineyno qorshahani hordhaca ah iyada oo aan soo dhaweyneyno wixii su'aalo ah iyo faalooyin ah. Todobadka soo socda waxa aanu idinla wadaagi doonaa dariiqo aan nagu weydiisaan su'aalo la xiriira sida dib loogu furayo iskuuladeena. Waxaad kala socotaa wixii warar cusub ah si jooqta ah sanduuqa email-kiina iyo xogtii ugu dambeysa halkani pps.net/fall2020.

Waad mahadsan tihiin.